Miisaaniyadda Guud ee Qiimaha Ku Salaysan

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa awood uu ku abuuro miisaaniyad guud oo qiimo ku saleysan oo loogu talagalay ururka daryeelka isku-duwan (CCO) taasoo si wanaagsan u dhiirigelin doonta maalgalinta xaqsoorka caafimaadka, dhiirrigelin doonta kharashaadka lagu bixiyo adeegyada caafimaadka la xiriira, loona sameyn doona si loo daboolo dhammaan kharashyada macquulka ah ee habboon ee ku saabsan maamulka barnaamijka CCO iyadoo heerarka kobaca kharashka yahay mid la saadaalin karo oo la jaanqaadayo yoolka kobaca kharashka ee gobolka.[1] Miisaaniyadaha guud ee qiimaha ku saleysan ee cususb waxay CCO-yada iyo adeeg bixiyeyaasha siin doontaa saadaalin iyo dabacsanaan waqti dheer ah, taasoo dhiirigelin doonta maalgelin dheeraad ah oo laga geliyo adeegyada kahortagga iyo adeegyada la xiriira caafimaadka si loo wanaajiyo natiijooyinka caafimaad loona yareeyo kharashyada daryeelka caafimaad ee laga ahaan karo.

Miisaaniyaddan guud ee qiimaha ku salaysan waxay beddeli doontaa dhiirrigelinada maaliyadeed ee nidaamka bixinta daryeelka: beddelkii dhaqaale ahaan la abaalmarin lahaa marka xubnaha Medicaid ay jiran yihiin oo ay heliyaan daryeel dheeraad ah, CCO-yada ayaa lagala xisaabtamayaa caafimaadka Xubnaha waxayna heli doonaan khayraadyo dheeraad ah oo ay maalgashadaan marka caafimaadka xubnaha uu hagaago, marka xaqsoor la'aanta la tirtiro, iyo marka dhacdooyinka caafimaad ee laga ahaan karo laga hortaga iyadoo loo marayo daryeel ka wanaagsan, oo isku-dubbaridan oo la siinayo xubnaha.

Marka la eego sharciga dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulida tijaabada ee 1115(a), gobolka Oregon wuxuu codsanayaa ka-tanaasulaad ku aadan sida caadiyan loo dejiyo sicirada saldhiga ah ee daryeelka ay maareyso Medicaid (CCO), iyadoo la joogteynayo qiimo macquul ah oo habboon, si loo gaaro yoolalka kor lagu sharaxay. Gaar ahaan, gobolka Oregon wuxuu codsanayaa awood ay:

1. Ku dejiyaan miisaaniyad aasaasi ah (sicirka saldhiga ah) oo macquul ah kuna filan adeegyada la daboolayo iyo halista dadka, taasoo ku saleysan taariikhda adeegsiga iyo kharash-gareynta sanado badan, isbeddellada haddeer jira, iyo kharashaadka ku baxa adeegyada caafimaadka la xiriira.
2. Qaab la saadaalin karo ugu sameeyan sicir/qiimo saldhig ah oo la isticmaali doono muddo shan sano ah, iyadoo aan dib-u-dejin lagu sameyn doonin miisaaniyadda saldhiga ah sannad kasta.
3. Ku kordhiyaan saadaalinta kharashyada iyadoo si khaas ah loo maareynayo kharashyada farmashiyaha, iyadoo la oggolaanayo hab-ganacsiyeed qaabeysan oo xiran lagana saarayo meesha daawooyinka ay caddaynta waxtarkooda caafimaad xaddidan tahay ama aan lahayn waxtar ku filan.

Dhibaatada iyo Araarta

Caafimaadka inta badan dadka laguma go'aamiya daryeelka caafimaad ee ay helaan balse waxaa lagu go'aamiyaa waxyaabo khuseeyo bulshada oo gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka, sida xaafada deegaanka iyo deegaanka la dhisay, helida cunto caafimaad leh, iyo fursadaha shaqo iyo dakhliga.[2] Gobolka Oregon wuxuu in badan sii aqoonsanayaa

[1] Yoolka qarashka qofkiiba ee sanadlaha ah ee lagu dabaqi doono dhammaan suuqyada daryeelka caafimaadka laga bilaabo 2021

[2] Magnan, S. (2017). Waxyaabaha Gacanta Ka Geysto Go'aaminta Caafimaadka 101 ee Daryeelka Caafimaadka: Five Plus Five. Akademiyadda Qaranka ee Caafimaadka (National Academy of Medicine). Laga heli karo: https://nam.edu/social-determinants-of-health-101-for-health-care-five-plus-five/

inaan u baahannahay inaan wax ka qabanno waxyaabo khuseeyo bulshada ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka si loo yareeyo kharashaadka caafimaadka oo kor loogu qaado xaqsoorka caafimaadka.[3]

Intaas waxaa dheer, Sagaalka Qabiil iyo Bulshooyinka Qabiil ee Oregon ee Federaalku Aqoonsan yahay; Latino/Latina/Latinx, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/Dadka Dhaladka Alaska, bulshooyinka midabka leh, dadka naafada ah, dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay, iyo bulshooyinka soo-galootiga iyo qaxootiga ayaa waxay leeyihiin xaalado bulsheed iyo kuwa deegaan oo xun iyo natiijooyin caafimaad oo liita, kuwaasoo qayb ahaan ka dhasha maalgelinta ay dawladda gobolka iyo federaalka geliyaan bulshooyinkan oo aa u yar. Safmareenka COVID-19 wuxuu hoosta ka xarriiqay arrintan ah in bulshooyinka midabka leh ay wajahayaan waxyeello heer sare ah marka la barbardhigo dhiggooda caddaanka ah.[4]

Nidaamka hadda jira ee ururada daryeelka la maareeyo ma dhiirigelinayo maalgelinta caafimaadka, kahortagga cudurada, natiijooyin caafimaad oo heer sare, ama xaqsoorka caafimaadka. Dhaqan ahaan, ururada daryeelka la maareeyo iyo daryeel caafimaad bixiyeyaasha ayaa la siiyaa lacag ku salaysan inta uu dhan yahay xanuunka xubinka iyo inta ay dhan yihiin adeegyada daryeelka caafimaad ee xubinka helayo. Guud ahaan, sicirka saldhiga ah ee ururada daryeelka la maareeyo ayaa kor u kaca sannadba sanadka ka dambeeyo marka xubnuhu xanuunsadaan oo ay qaataan adeegyo badan iyo/ama ay galaan kharashyo badan waxayna qiyaasta hoos u dhacdaa haddii bukaanadu caafimaad qabaan oo ay u baahan yihiin adeegyo yar. Qaabkan lacag-bixin ayaa ah mid aan dhiirigelin u lahayn in diiradda la saaro kahortagga cudurada, maareynta daryeelka, iyo waxqabadyada kale ee qiimaha jaban ee looga ahaan kara xanuunka iyo adeegyada uu u baahan yahay xubinka marka uu xanuunsado.

Markii gobolka Oregon uu abuuray CCO-yada iyo moodheelka daryeelka isku-duwan ee Medicaid sanadkii 2012, yoolka koowaad wuxuu ahaa in laga guuro moodheel aasaasiyan diiradda saarayay bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka loona guuro moodheel cusub: ururada bulshada ay maamusha oo raacayo moodheel dhaqaale oo ka duwan kii hore oo diiradda saaraya wanaajinta natiijooyinka caafimaadka iyo maareynta caafimaadka dadweynaha. Gobolka Oregon wuxuu han-weynaa inuu hirgeliso hab qiimo-dejinta oo leh laba yool:

1. in maalgelinta caafimaadka jireed, habdhaqaneed iyo caafimaadka afka laga iskugu geeyo hal meel si markaa hal urur uu mas'uul uga noqdo dhammaan baahiyaha daryeelka caafimaad ee xubnihiisa; iyo
2. in la beddelo dhiirrigelinta maaliyadeed ee nidaamka daryeelka caafimaadka si markaa abaalmarinta maaliyadeed ay uga timaaddo dadka loo adeegayo ee caafimaad qaba, beddelkii ay ka iman lahayd kuwa xanuunsan.

Marka la eego habka asalka ah ee qiimo-dejinta CCO-yada Oregon, yoolku wuxuu ahaa in la arko nidaamka caafimaadka oo beddelaya kharashaadka si diirada loo saaro ka hortagga cudurada ee yaraynaya daryeelka xaaladaha degdegga ah ee la iska ilaalin karo; tusaale ahaan, maalgelin xooggan oo lagu sameeyo caafimaadka habdhaqaneed ee bulshada taasoo looga fogaan kara booqashooyinka isbitaalka. Yool kale wuxuu ahaa in la arko lacago sii kordhaya oo lagu kharash gareeynayo adeegyada caafimaadka la xiriira – sida kuwa wax looga qabanayo baahiyada bulshada, sida guriyeynta iyo cuntada – iyadoo ujeedadu tahay wanaajinta caafimaadka iyo ka fogaanshaha kharashaadka caafimaadka.

Gobolka Oregon wuxuu ku guulaystay isku darka maalgelinada loogu talagalay adeegyada daryeelka caafimaadka ee biilka leh; si kastaba ha ahaatee, marka la eego shuruudaha federaalka ee haddeer ee sicirka saldhiga ah, weli ma aanan arag isbeddel dhab ah oo ku saabsan dhiirrigelinta maaliyadeed ee natiijooyinka aan raadinayno. Ujeedada miisaaniyadda guud ee qiimaha ku salaysan weli si buuxda loogama xaqiijin gudaha Oregon. Gaar ahaan, qiimooyinka CCO-yada waxay inta badan weli ku saleysan yihiin kharashaadka caafimaad ee dhowaana ahaa, waxayna sii wadista tani adkeyneysaa in khayraadyada loo wareejiyo kahortagga cudurada iyo adeegyada caafimaadka la xiriira, iyo in la xakameeyo kharashyada.

---

[3] https://www.kff.org/racial-equity-and-health-policy/issue-brief/beyond-health-care-the-role-of-social-determinants-in-promoting-health-and-health-equity/; https://www.commonwealthfund.org/sites/default/files/2019-07/COMBINED-ROI-EVIDENCE-REVIEW-7-1-19.pdf

[4] https://www.kff.org/racial-equity-and-health-policy/issue-brief/disparities-in-health-and-health-care-5-key-question-and-answers/

Gobolka Oregon wuxuu ilaa iyo intii suurtogal ah sameeyay halabuur ku aadan shuruudaha CMS ee haddeer jira ee sicirka saldhiga ah ee daryeelka la maareeyey si loo beddelo dhiirrigelinta maaliyadeed si kor loogu qaado caafimaadka dadweynaha. In kasta oo gobolka Oregon uu dadaalo u galay in la nidaamiyo habka sicir dejinta waqti kadib (eeg sanduuqa bogga xiga), istaraatijiiyadan kuma aysan filnaanin in ay si aasaasi ah u beddelaan moodheelka dhaqaale ee hagayo kharashka CCO-yada. Intii ay sii kordhayso, gobolka Oregon ma aysan arag isbeddel muuqda oo ku saabsan qaddarka ay CCO-yadu ku bixiyaan adeegyada la xiriira caafimaadka. Kharashaadka ku baxa adeegyada caafimaadka la xiriira ayaa celcelis ahaan ah 0.7% miisaaniyada sanadlaha ah ee CCO-yada. Fikradda miisaaniyadda guud ee asalka ah ee Oregon waxaa looga dan lahaa in la dhiirigeliyo wada-hadalo maxalliga ah, kuwa bulsheed oo ku saabsan sida loo beddelo kharashka nidaamka si wanaagsan loogu daboolo baahiyada bulshada iyo in si caqli-gal ah loo isticmaalo khayraadyada xaddidan si loo kordhiyo natiijooyinka caafimaadka. Si kastaba ha ahaatee, kala qaybinta kharashaadka gudaha nidaamka daryeelka caafimaadka ee Oregon (tus., qiyaasta loo kala qaybinayo caafimaadka jirka, habdhaqanka, iyo caafimaadka afka) ayaa inta badan weli sidii hore ah, taasoo muujinaysa in kharashku uu raacayo caadooyinka taariikhiga ah iyo awoodda suuqa, beddelkii uu raaci lahaa isbeddel dhab ah oo diiradda saaraya caafimaadka dadweynaha. Gobolka Oregon si buuxda wax ugama qaban karo xaqsoor la'aanta caafimaadka mana sixi karo cunsuriyadda taariikhiga ah iyo dheelitir la'aanta awoodda nidaamka caafimaadka haddii aysan dhiirigelinada maaliyadeed ee nidaamka si buuxda diiradda u saarin caafimaadka dadweynaha oo aysan kicin wada-hadalo bulsheed oo ku saabsan mudnaan-siinta khayraadyada si loo gaaro natiijooyin wanaagsan.

Habka qiimeyntu wuu is beddelaa ilaa iyo maanta

Sicirada CCO ayaa la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo hab soo kobcayay in muddo ah si loo sameeyo dadaal lagu dhiirigelinayo isticmaalka adeegyada waxtar badan leh oo qiima jaban iyo in la yareeyo fursadaha ka faa'iideysiga iyo faa'iidada xad-dhaafka ah ee laga sameeyo kharashka helida iyo tayada caafimaadka ee xubnaha, iyadoo aan laga baxaynin xuduudaha mabaadi'da dhabta ah ee xisaabaha iyo caymiska. Tusaale ahaan:

- **Xogta saldhiga ah ee gobolka oo dhan.** Intii lagu gudajiray qandaraaska CCO ee ugu dambeeyay ee 5-ta sano ah ee la qabtay 2019, OHA waxay soo bandhigtay isticmaalka xogta saldhiga ah ee gobolka oo dhan marka ay sameyneyso sicirka saldhiga ah ee bilowga ah. Sababta tani loo sameeyay waa in la smio saameynta isticmaalka sare ee mid kasta oo ka mid ah CCO-yada lagana hortago in ay si aan xad lahayn kor ugu kiciyaan sicirada, iyadoo la adeegsanayo arrimaha gobolka si loo hubiyo in sicirada ay ka tarjumayaan kala duwanaanshaha habboon ee isticmaalka iyo qiimaha.
- **Barnaamijka Abaalmarinta ee Ku Salaysan Waxqabadka.** Sanadka 2022, OHA waxa ay hirgelin doontaa Abaalmarin Ku Salaysan Waxqabadka (PBR), oo ah barnaamij lagu ansixiyay dib-u-cusboonaysiintayada ka-tanaasulida ee u dambaysay kaasoo loo naqshadeeyay in lagu abaalmariyo guulaha adeegyada caafimaadka la xiriira iyo xakamaynta kharashka, iyadoo ku xiran ilaalinada tayada. PBR wuxuu kala duwaa heerka faa'iidada CCO-yada iyadoo loo eegayo inta ay ku bixiyeen HRS, si loo dhiirigeliyo qaadashada balaaran ee adeegyada waxtarka badan ee caafimaadka. Tani waxay qayb ahaan kahortagaysaa waxa loogu yeero "hoos u dhaca lacagta caymiyuhu bixiyo" halkaasoo kaydku uusan dhiirigelin u ahayn CCO-yada, sida marka sicirada la dejiyo iyadoo la isticmaalayo kharashka taariikhiga ah iyo xogta isticmaalka, CCO-yada yareeya kharashyada waxay arkaan hoos u dhac ku yimaada sicirada sanad kasta.

Gobolka Oregon wuxuu raadsanayaa awood uu ugu tiirsado habka sicirka saldhiga leh si loo sameeyo miisaaniyad guud oo cusub oo qiime ku salaysan taasoo sida ugu suurtogalsan u fudud in bulshada iyo CCO-yada ay u ahmaan, sidoo kalena ah

mid ah gobolka iyo bulshadaba ay saadaalin karaan. Waxay u baahan tahay inay cadayso in haddii diirada la saaro kharashka ku baxaya xaqsoorka caafimaadka, kahortagga cudurada, isku-duwidda daryeelka iyo tayada, CCO-yadu ay wanaajin doonaan caafimaadka oo ay heli doonaan kayd. Habkan la hagay waxaa ku lamaanaan doona kala xisaabtanka baahiyada xubnaha iyo bulshada oo adag, iyo sidoo kale istaraatijiyado lagu hubinayo in kharashka xaqsoorka caafimaadka ay hogaaminayso bulshada.

Marka la hirgeliyo isbeddellada la soo jeediyay ee Oregon ee lagu abuurayo miisaaniyad guud oo qiima ku salaysan, waxaan filan karnaa natiijooyinka soo socda:

- Koror la taaban karo oo ku yimaada adeegyada caafimaadka la xidhiidha oo ay la socoto dhimista culayska maamul ee tirinta fahfaahsan ee adeegyada caafimaadka la xidhiidha si loo helo “amaahda” dejinta sicirka (sida hadda looga baahan yahay Abaalmarinta Ku Salaysan Waxqabadka). Kharashka ku baxa adeegyada caafimaadka la xiriira oo kordho ayaa horseedi doona:
    - Maalgalin badan oo lagu sameeyo caafimaadka bulshada taasoo kor u qaadaysa xaqsoorka caafimaadka
    - Maalgalin badan oo lagu sameeyo adeegyo kahortagha cidirada oo tayo sare leh
- Kororka isuduwidda daryeelka iyo maaraynta wanaagsan ee xubnaha gala kharashyo badan, oo ay ku jiraan xubnaha ka gudbaya nidaamyada iyo marxaladaha nolosha: xabisyada, Isbitaalka Gobolka Oregon, Adeegyada deegaanka ee Caafimaadka Maskaxda, dhalinyarada daryeelka korinta – iyadoo sababtu tahay dhiirigelin maaliyadeed ee cad oo loogu talagalay horumarinta natiijooyinka.
- Hoos u dhaca ku yimaada kharashka ku baxa daryeelka qiimaha hoose iyo marxaladaha laga maarmi karo marka CCO-yadu ay lacagaha u wareejiyaan kahortagga iyo isku-duwidda daryeelka.
- In bulshada ay CCO-yada u adeegayo kala xisaabtanto sida miisaaniyadooda ku salaysan qiimaha loo isticmaalo.
- Heerka kobaca kharashku wuxuu ku xaddidan yahay yoolalka si guud loo go'aamiyay (eeg sanduuqa hoose) wuxuuna u dhigmaa guud ahaan yoolalka kharashka ee nidaamka daryeelka caafimaad ee Oregon.

Istaraatiijiyada miisaaniyada guud ee ku salaysan qiimaha ee Oregon waxaa qayb muhiim ka ah u-heelanaanta kobac waara. Istaraatiijiyadu waxay had iyo jeer ku saabsanayd in la kaydiyo lacag iyadoo loo marayo kharash-bixin hufan oo waxtar leh taasoo horseedaysa natiijooyin caafimaad oo wanaagsan beddelkii la dhimi lahaa adeegyada ama la adkeyn lahaa u-qalmitaanka.

Moodheelka CCO ee Oregon waa mid hal-abuur leh oo kharashkiisu wax-ku-ool yahay. Laakin, in kobaca kharashka uusan ka bixin yoolka ayaa weli caqabad ah. Daka joogo Oregon waxay wajahaan dhibaato xagga guriyeynta ah oo ka jirta gobolka oo dhan, xaaladaha degdega ah ee cimilada joogtada ah ee ay keenaan isbeddelada cimileed, iyo xaqsoor la’aan baahsan oo ka dhalata cunsuriyadda nidaamsan – taasoo, wadar ahaan, horseedayso kharashyada daryeelka caafimaadka oo sareeya.

Habka miisaaniyada guud ee qiimaha ku salaysan ee lagu soo jeediyay warqaddan fikradda ah wuxuu abaal-marin doonaa kharashka ku baxa natiijooyin caafimaad oo xaqsoor leh oo tayo sare leh **wuxuuna isla markaana ka caawinayaa gobolka Oregon inuu sii wado xakameynta kobaca kharash ee qof kasta.**

Gudaha *Maalgelinta Xaqsoorka la Diirada Saaray* ee warqadda cilmi-baarista, waxaan ku soo jeedineynaa in kaydka federaalka iyo gobolka ee laga helay u-heelanaantayada kobaca waara ee 3.0-3.4% (dhammaan suuqyada, ma ahan keliya Medicaid) lagu wadaagi doona heer gobol iyo

heer degmo si loo maalgeliyo hindisayaal muddo dheer socon doono oo muujin doona horumar la qiyaasi karo oo ku wajahan xaqsoorka caafimaadka. Marka la isbarbardhigo, isbeddelka Medicaid ee qaran ayaa la saadaalinayaa inuu noqdo 4.9% sanadka 2022 illaa 2028.[5]



[5] Saadaasha NHE (qaran), Shaxda 17 - Saadaasha NHE 2019-2028

Istaraatijiyadaha la soojeediyay

In kastoo waxyaabaha ugu badan ee saameeya dhererka iyo tayada noloshu ay yihiin xaaladaha bulsho ee ay dadku ku nool yihiin, ku shaqeeyaan, kuna ciyaaraan, nidaamka daryeelka caafimaadka ee Maraykanku wuxuu sannad kasta balaayiin doollar ku lumiyaa adeegyo aan loo baahnayn, adeeg bixin aan waxtar lahayn, iyo kharashyo aan u dhigmin adeega la bixinayo. Iyadoo la beddelayo lana fududeeynayo dhiirigelinta asalka ah, gobolka Oregon wuxuu doonayaa in maalgalinta loo wareejiyo dhanka isticmaalka ballaaran ee adeegyada loogu talagalay in wax looga qabto waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada iyo maalgalinada xaqsoorka caafimaadka ee inta badan ka baxsan adeegyada daryeel caafimaad bixiyaha, taasoo hoos u dhigaysa xaqsoor la'aanta caafimaadka isla markaana wanaajinayso caafimaadka guud.

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa ka-tanaasulaad ku aadan sida caadiyan loo dejiyo sicirada saldhiga ah ee CCO-yada, iyadoo la joogteynayo qiimo macquul ah oo habboon, si loo gaaro yoolalka kor lagu sharaxay. Gaar ahaan, waxaan codsaneynaa awood an:

- Ku dejino miisaaniyad aasaasi ah (sicirka saldhiga ah) inagoo isticmaaleyno taariikhda adeegsiga iyo kharashaadka ee muddo shan sano ah, isla markaana eegayno isbeddellada haddeer jira si aan u xaqiijino in sicirka aasaasiga ah yahay macquul kuna filan yahay adeegyada la daboolayo iyo halista dadka, iyo in uu u dhigma kharashaadka ku baxa adeegyada caafimaadka la xiriira. Miisaaniyadda saldhiga ah ayaa la sameyn doonaa iyadoo la tixgalinayo kharashaadka caafimaadka ee taariikhiga ah iyo sidoo kale kharashaadka adeegyada caafimaadka la xiriira, si loo dhiirigeliyo in kharashaad lagu bixiyo hawlaha la xaqiijiyay inay ka hortagayaan cudurada iyo dhimashada.
- Qaab la saadaalin karo ugu sameyno sicir/qiimo saldhig ah oo la isticmaali doono muddo shan sano ah inagoo wax-ka-beddelka miisaaniyada ku saleyneyno yoolka kobaca kharashka daryeelka caafimaad ee cusub ee dhammaan gobolka Oregon, iyo sidoo kale wax-ka-beddelada kale ee la beegsanayo ee loo baahan yahay si wax looga qabto dhacdooyinka aan la saadaalin karin, inagoo oo aan dib u dejin ku sameyneynin miisaaniyada saldhiga ah sanad kasta.
- Ku kordhino saadaalinta kharashyada iyadoo si khaas ah loo maareynayo kharashyada farmashiyaha, iyadoo la oggolaanayo adeegsiga hab-ganacsiyeed qaabeysan oo xiran lagana saarayo meesha daawooyinka ay caddaynta waxtarkooda caafimaad xaddidan tahay ama aan lahayn waxtar ku filan. Istaraatiijiyadani waxay sidoo kale gacan ka geysan kartaa xakamaynta kharashyada farmashiyaha ee daawooyinka degdega ah iyadoo loo marayo siyaabo lagu dhimi karo isbeddelada sicirka ee mustaqbalka ah.

Si loo ilaaliyo xaqa xubnaha OHP ay u leeyihiin dhammaan macaashyada Medicaid ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah iyo si loo yareeyo saamaynta aan la rabin ee ka dhalata codsiyada ka-tanaasulaada ee kor ku xusan, gobolka Oregon wuxuu sameyn doonaa waxyaabaha soo socda:

Istaraatijiyada yareeynta ee 1-aad: Samee barnaamij ilaalino oo xoogan si loo ilaaliyo xubnaha iyadoo loo marayo cabbiraadda joogtada ah iyo warbixinada CCO-yada ee ku saabsan helitaanka, tayada, iyo natiijooyinka daryeelka si loo xaqiijiyo inaysan jirin ka-faa'iidaysiga aan habboonayn ama diidmada daryeelka lagama maarmaanka ah.

Istaraatijiyada yareeynta ee 2-aad: Samee kormeer maaliyadeed oo xoogan oo sanadle ah, oo ay ku jiraan kormeerida ka faa'iidaysiga iyo kharash-gareynta, si loola socdo hantida CCO-yada iyo si loo xaqiijiyo in yoolalka sanadlaha ah ay yihiin kuwo macquul ah marka la eego bixinta kharashaadka la filayo, sidoo kalena in la sameeyo hab wax looga beddelayo miisaaniyada haddii dhacdooyinka aan la filaynin, sida daaweyn cusub oo kharashkeedu badan yahay, ay keenaan in qiyaasta sannadlaha ah aysan ku filnayn daboolida baahiyada caafimaad ee xubnaha.

1. Ku dejiyaan miisaaniyad aasaasi ah (sicirka saldhiga ah) oo macquul ah kuna filan adeegyada la daboolayo iyo halista dadka, taasoo ku saleysan taariikhda adeegsiga iyo kharash-gareynta sanado badan, isbeddellada haddeer jira, iyo kharashaadka ku baxa adeegyada caafimaadka la xiriira.

   Si run ahaantii loo diiradda loo saaro bixinta daryeel leh tayada ugu sareeysa, gobolka Oregon wuxuu u baahan yahay miisaaniyad guud oo qiimo ku salaysan oo loogu talagalay CCO-yada taasoo sahlan lana saadaalin karo sida ay noqonayso mustaqbalka, taasoo meeshana ka saaraysa dhiirigelinta dhabta ah ama la dareensan yahay ee ku saabsan kharash-gareynta daryeelka caafimaad ee aan lagama maarmaanka ahayn ee aan faa'iido lahayn mustaqbalka. U guurista miisaaniyad qiimo ku salaysan waxay keeni doontaa in CCO-yada diiradda saaraan bixinta daryeel tayo sare leh beddelkii la kordhin lahaa kharashaadka sannadlaha ah si sare loogu qaado sicirada sanadka soo socda.

   Marka la eego soojeedinta ka-tanaasulaada ee Oregon, gobolku wuxuu dejin doonaa miisaaniyada CCO-yada ee qiimaha ku salaysan oo loogu talagalay gobolka oo dhan oo bilow ah, macquul ah oona haboon taasoo inta badan la jaanqaadayso sida miisaaniyada saldhiga ah loo dejiyo maanta, marka laga soo tago laga ka-reebitaano:

   - Tixgelinta isbeddellada taariikhiga ah ee wakhti dheer (ilaa shan sano) si loo kordhiyo kalsoonida in miisaaniyada saldhiga ah ay tahay mid wanaagsan, iyo
   - Ku darista kharashka ku baxa adegyeada la xiriira caafimaadka, marka laga soo tago kharashka ku baxayo adeegyada qorshaha gobolka, ee muddo ilaa shan sano ah.

   Intaas waxaa dheer, si loo joogteeyo diiradda saarista baabi'inta xaqsoor la'aanta caafimaadka, gobolka Oregon wuxuu qorsheynayaa inuu fara CCO-yada inay ugu yaraan 3% miisaaniyadahooda guud ee qiimaha ku salaysan ku aadiyaan maalgalinta xaqsoorka caafimaadka (sida uu dhigayo sharciga Oregon House Bill 3353), taasoo ugu yaraan 30% la gelin doona hay'adaha bulshada ee loo yaqaan iskaashatooyinka maalgalinta bulshada ee gobolka (CIC-yada), si ay u maalgeliyaan xaqsoorka caafimaadka bulshada. (Eeg warqadda fikradda ee *Maalgalinta Xaqsoorka Diiradda la Saaray*). Goblka Oregon wuxuu soojeedinayaa in la sameeyo qaab isla-xisaabtan oo ay bulshadu hogaamineyso oo loogu talagalay dhammaan kharashka ku baxa xaqsoorka caafimaadka ee loo baahan yahay oo uu ku jira guddiga kormeerka ee gobolka oo dhan marka laga soo tago CIC-yada goboleed. Sida kor lagu xusayba, gobolka Oregon wuxuu codsanayaa awood uu kharashaadka la xiriira caafimaadka ee hoos yimaada HB 3353 ugu tixgelin kara inay qayb ka yihiin kharshka caafimaadka marka la xisaabinayo sicirada, si markaa shardiga farayo maalgelinta xaqsoorka caafimaadka uusan si xun u saameynin sicirada CCO-yada ee mustaqbalka.

   Mustaqbalka, gobolka Oregon wuxuu wax ka beddeli doonaa miisaaniyada CCO-yada sanad walba iyadoo la adeegsanayo kobaca sicirka oo la saadalin karo, taasoo waafaqsan yoolalka gobolka oo dhan ee kobaca waara, wuxuuna gobolka si taxadar leh ula socon doonaa kharashaadka CCO si loo aqoonsado wixii ah wax-ka-beddel dheeraad ah oo la beegsanayo ee lagama maarmaanka u ah in wax laga qabto dhacdooyinka aan la sadaalin karin.

2. **Qaab la saadaalin karo ugu sameeyan sicir/qiimo saldhig ah oo la isticmaali doono muddo shan sano ah, iyadoo aan dib-u-dejin lagu sameyn doonin miisaaniyadda saldhiga ah sannad kasta.**

   Gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa in, iyadoo lala jaanqaadayo dhimista kharashaadka daryeelka caafimaadka ee dhammaan qaybaha, miisaaniyadaha CCO-yada loo sameeyo qaab oggolaan doono in la isticmaali muddo shan sano ah oo soo socota iyadoo lagu saleynayo yoolka kobaca kharashka daryeelka caafimaadka ee gobolka oo dhan, kaasoo noqon doona 3.0 ilaa 3.4 boqolkiiba inta lagu gudajira xilliga tijaabada. Ku salayntan mustaqbalka waxay CCO-yadu u oggolaanaysaa saadaalin dheeraad ah si ay maalgalin muddo dheer ah ugu sameeyaan xaqsoorka caafimaadka, kahortagga cudurada, iyo horumarinta bulshada—taasoo horseedaysa dadweyne guud ahaan caafimaad qaba isla markaana yareneyso kharashyada daryeelka caafimaadka waqti kadib. Wax-ka-beddelka sicirka yoolka ah ayaa la samayn doonaa markay jiraan isbedelo la taaban karo ee halis u keenayo CCO-da, macaashyada caynsan, iyo

dadweynaha gobolka oo dhan, tusaale ahaan, waqtiyada ay jiraan isbeddelada waaweyn sida ballaarinta caymiska inta lagu gudajiro safmareenka COVID-19.

Marka lagu daro istaraatiijiyad tayo oo la xoojiyay iyo awoodda lagu tixgelinayo in adeegyada caafimaadka la xiriira ay qayb ka yihiin kharashka caafimaadka marka la dejinayo sicirka, naqshadeyntan waxay CCO-yada u oggolaanaysaa in ay la haraan kaydka ka imanaya hoos u dhaca habboon ee ka faa'ideysiga/isticmaalka. Waxay sidoo kale u abuuri doontaa dabacsanaan dheeraad ah si CCO-yadu u maalgashadaan wanaajinta daryeelka, oo ay ku jirta maalgelinta daryeelka kahortagga cduurada, wax ka qabashada baahiyada bulshada, iyo baabi'inta xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Gobolka Oregon wuxuu sidoo kale aqoonsan yahay in dabacsanaanta la xoojiyey ay tahay in lagu lammaaniyo ilaalinada xubnaha oo xoogan, gaar ahaan kuwa wax looga qabanayo xaqsoor la'aanta caafimaadka ee jirta. Taa awgeed, gobolka Oregon wuxuu sidoo kale soojeedinayaa nidaam isla-xisaabtan oo xoogan oo leh istaraatijiyado dhimis oo cusub oo daboolaya afar aagg oo mudnaan leh: xaqsoorka, qanacsanaanta xubinka iyo adeeg bixiyaha, helida, iyo tayada daryeelka, oo si faahfaahsan loogu sharaxay bogga. 8.

3. **Ku kordhiyaan saadaalinta kharashyada iyadoo si khaas ah loo maareynayo kharashyada farmashiyaha iyadoo lagu dhaqmayo hab-ganacsiyeed qaabeysan oo xiran iyo iyadoo laga saarayo meesha daawooyinka ay caddaynta waxtarkooda caafimaad xaddidan tahay ama aan lahayn waxtar ku filan.**

Gobolka Oregon wuxuu raadsanayaa awood uu si dhow ugu maareyn kara kharashaadka farmasiga ee barnaamijkiisa Medicaid, iyadoo loo marayo istaraatiijiyad laba qaybood ah:

A. Ku dhaqan hab-ganacsiyeed qaabaysan oo xiran

Ku dhqanka hab qaabeysan oo xiran oo loogu talagalay xubnaha qaangaarka ah, oo ay ku jirta ugu yaraan hal daawo qaybtii daawaynba, wuxuu OHA iyo CCO-yada awood u siinaysaa inay la xaajoodaan soosaarayaasha oo ay la galaan heshiisyo leh qiimo dhimis fiican. Gobolka Oregon wuxuu caruurta u joogteyn doonaa hab furan. Qaybta kasta oo daawaynba, soo saarayaasha waxa loo dammaanadqaadi karaa mug dhab ah oo laga hoor maraynin si loo helo lacag celin/qiimo dhimis weyn. Haatan, waxaa xadidan awooda ay OHA iyo CCO-yadu ugu dammaanadqaadi karaan soosaarayaasha mug noocan ah marka loo eego shuruudaha dhigayo in la caymiyo dhammaan daawooyinka ku jira barnaamijka dhimista ee Medicaid. OHA waxay abuuri doontaa hannaan wada-shaqeyn oo ay ku jiraan CCO-yada si ay u doortaan daawooyinka habka xiran.

Sanadihii la soo dhaafay inta badan maareeyayaasha faa'iidooyinka farmashiyaha ganacsi (PBM-yada) waxay ku dhaqmayeen habaka xiran ee noocan ah, kuwaasoo u oggolaanaya inay qaabeeyaan daawooyinka ay bixiyaan iyadoo lagu saleynayo waxtarka caafimaad iyo tixgelinada qiimaha. Tusaale ahaan, 2021 CVS Health waxay meesha ka saartay 57 beddeecooyinkeeda dheeraadka ahaa ee jiray–iyadoo qayb ahaan ugu wacan tahay in la heli karay daawooyin ka qiimo jaban una dhigmo halka ay qaar kalena meesha uga saartay qiimahooda oo sabab la'aan cirka isku shareeray. Qorshaha ganacsi ee Qaybta D ee Medicare sidoo kale waa loo oggol yahay inay ku dhaqmaan hababka xiran ee noocan ah (sida lagu oggolaaday 42 CFR 423.120) iyadoo lagu dabaqayo ugu yaraan laba daawo qaybtii daawaynba. Qorshayaasha Qaybta D ee Medicare waxay sidoo kale ku dari karaan hal daawo qaybtiiba haddii keliya hal daawo la heli karo, ama haddii laba daawo keliya la heli karo laakiin hal daawo ay caafimaad ahaan ka sarreeysa mida kale. Maadaama Medicare iyo qorshayaasha kale ee ganacsi loo oggol yahay in ay ku dhaqamaan hababka xiran, waxaan aaminsanahay in gobolka Oregon uu dabacsanaan la mid ah taasi u lahaado Medicaid.

B. Oggolow in meesha laga saaro daawooyinka ay caddaynta waxtarkooda caafimaad xaddidan tahay ama aan lahayn waxtar ku filan

Daawooyin badan oo suuqa ku soo galayo tubta ansixinta degdega ah ee FDA ayaan wali muujin faa'iido caafimaad waxaana lagu darsay tijaabooyin caafimaad iyadoo la adeegsanayo kaliya xiriir saameyn oo dhab

ahayn. Gobolka Oregon wuxuu raadsanayaa awood uu ku isticmaalo nidaam dib-u-eegis oo adag oo isagu gaar u ah si loo go'aamiyo caymiska daawooyinka cusub iyo si mudnaan loo siiyo in bukaanadu helaan daawooyinka caafimaad ahaan la xaqiijiyay ee waxtarka leh. Haddii habkan la raaco, gobolku wuxuu ka fogaan karaa kharashaadka xad-dhaafka ah ee daawooyinka qaaliga ah ee aan caafimaad ahaan lagama maarmaanka ahayn. Sharciga 21st Century Cures Act waxaa looga dan lahaa in la dedejiyo nidaamka ansixinta daawada iyadoo la dhimayo heerka caddaynta looga baahan yahay daawooyinka si ay suuqa u gaaraan iyo iyadoo loo oggolaanayo dhakhaatiirta, bukaannada, iyo bixiyeyaasha inay go'aan ka gaaraan inay iibsanayaan daawada iyo in kale. Nasiib darrose, sharciyada hadda jira ma oggola in barnaamijyada Medicaid ay gaaraan go'aan ku saabsan in daawooyinkan la cayminayo iyaga oo aan caafimaad ahaan si buuxda loo cadaynin iyo in kale.

Gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa in laga faa'iidaysto dabacsanaanta cusub ee lagu bixinayo ka-tanaasulkan si daawooyinka ay caddaynta waxtarkooda caafimaad xaddidan tahay ama aan lahayn waxtar ku fila looga saaro habkeeda qaabeysan ee xiran. Waxtarka caafimaad ee xadidan ama aan ku filneyn ayaa lagu qeexi karaa marka mid ama in ka badan oo ka mid ah xaaladaha soo socda ay jiraan:

- Ujeedooyinka aasaasiga ah ee tijaabooyinka caafimaad weli lama gaarin.
- Kaliye xiriir saameyn oo aan dhab ahayn ayaa laga soo warbixiyay.
- Macaashyada caafimaad lama qiimaynin.
- Daawadu wax faa'iido caafimaad oo dheeraad ah kuma soo kordhineyso qaybteeda, marka la barbardhigo daawooyinka beddelka u ah ee jira.

Daawooyinka cusub ee lagu ansixiyay tubta ansixinta degdega ah ee FDA waxay noqon karaan kuwa si gaar ah qaali u ah waxayna ku fiicnaan lahayeen qiimayn caymis oo aad u adag iyo in la saaro calaamad muujineyso inaysan habka ka mid ahayn markii ay habboon tahay. Intaas waxaa dheer, dib-u-habaynta daawooyinka in badan soo jiray ee aan lahayn wax ah faa'iido caafimaad oo dheeraad ah ayaa sidoo kale la saari karaa calaamad muujineyso inaysan habka ka mid ahayn. In kastoo lacag-bixiyayaasha ganacsi ay gaari karaan go'aan ah inay daawooyin ka saaraan habkooda xaaladahan oo kale ah, OHA iyo CCO-yadu haatan ma haystaan awoodan.

Iyadoo qayb ka ah dadaalladayada, waxaan xaqiijin doonnaa ilaalinada farmashiga ee loogu talagalay xubnaha, si markaa maaraynta khaaska ah ee Oregon ay ku sameyneyso kharashyada farmashiyaha aysan si xun ugu saameynin marinka xubnaha ay u helayaan noocyada kala duwan ee daawooyinka badqabka ah lehna waxtarka ee lagu daaweeyo cudurada kala duwan.

Ilaali marin u-helida xubnaha, tayada, iyo xaqsoorka caafimaadka

Dhammaan istaraatijiyadan iyo aaladahan waxay kor u qaadi doonaan saadaalinta iyo dabacsanaanta loogu talagalay CCO-yada, si markaa gobolka Oregon uu barnaamijkiisa Medicaid uga gaaro moodheel dhaqaale oo gooni ah – mid abaalmarinaya xaqsoorka caafimaadka, adeegyada kahortagga cudurada, iyo wanaajinta caafimaadka dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in isbeddelada sicir dejinta lagu lammaaniyo ilaalino habboon si loo xaqiijiyo in marin u-helida iyo tayada la ilaaliyo lagana hortago wixii ah dhiirigelin ee keenayso in la bixiyo daryeel aan ku filnayn ama tayadeedu hooseeyso. Intaas waxaa dheer, kormeerada taxadarka leh ee warbixinta maaliyadeed ayaa waxay xaqiijin doontaa in CCO-yadu aysan si aan habboonayn u abaalmarinaynin saamilayda ama milkiilayaasha ganacsiga iyagoo isla markaana culeys saarayo xubnaha OHP iyo bulshooyinka.

Istaraatijiyada yareeynta ee 1-aad: Samee barnaamij ilaalino oo xoogan si loo ilaaliyo xubnaha.

Istaraatiijiyada miisaaniyada qiimaha ku salaysan ee Oregon waxaa loogu talagalay in ay abuurto dabacsanaan dheeraad ah oo ay u ogolaato CCO-yada in ay la haraan kaydka ka imanaya go'aanada wanaagsan ee kharash-garaynta. Si kastaba ha noqotee, haddii uusan jirin nidaam isla-xisaabtan oo xoogan, waxaa jira halis ah inay saameyn xun soo gaarto xaqsoorka caafimaadka iyo mariinka ay xubnaha u helayaan daryeel tayo sare leh sababo

la xiriira faa'iido-raadiska nidaamka dhexdiisa ah awgood. Si loo yareeyo halista noocan ah, gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa qaab-dhismeed isla-xisaabtan oo dhammaystiran si wax looga qabto xaqsoor la'aanta caafimaadka, loo xaqiijiyo qanacsanaanta xubnaha iyo adeeg bixiyaha, iyo si loo ilaaliyo marin u-helida xubinta iyo tayada daryeelka. Sanad walba, gobolka Oregon wuxuu samayn doonaa qiimayn guud oo lagu sameynayo qorshe kasta oo ay ku lamaanan yihiin heerar gaar ah iyo habab ku salaysan qandaraas si loo xaqiijiyo in CCO-yada aysan hoos ka marin miqyaasyada ugu hooseeya ee mid kasta oo ka mid ah afartan aagg: xaqsoorka, qanaacada xubnaha iyo bixiyaha, marin u-helida, iyo tayada daryeelka.

Marka hore, gobolka Oregon wuxuu qiimayn doonaa xaqsoor la'aanta caafimaadka iyadoo la kormeerayo duleelada qanaacada xubnaha, marin u-helida xubnaha, iyo tayada daryeelka dadka mudnaanta la siinayo ee ay waxyeelada ugu badan ka soo gaartay xaqsoor la'aanta caafimaadka. Kuwani waxaa ka mid ah laakiin kuma xadidno Qabiilada iyo bulshooyinka Qabiilka; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/bulshooyinka ah Dhaladka Alaska, iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga. Gobolka Oregon wuxuu isticmaali doonaa aalado sida:

- Uruurinta xog u oggolaanaysa Gobolka in uu la socdo tayada daryeelka iyadoo lagu salaynayo jinsiyada iyo qowmiyadda, sida iyadoo loo marayo REALD;
- Tixgelinta/ka soo warbixinta inta ugu badan ee cabbirrada tayada ee aasaasiga ah iyadoo lagu salaynayo jinsiyada, qowmiyadda iyo luqadda ilaa iyo intii suurtagal ah;
- Kormeerida waxqabadka cabbirada xaqsoorka diiradda saaraya (sida helida turjubaanada);
- Tixgelinta ku filnaanshaha shabakada CCO marka la eego arrimaha xaqsoorka sida awoodda adeeg bixiyaha ee ku aadan dhaqanka iyo luqadda macmiilka; iyo
- Isticmaalka aalado sida sahannada Qiimeynta Macmiilka ee ku saabsan Daryeel Bixiyayaasha Caafimaad iyo Nidaamyada (CAHPS) iyo xogta tayada ee laga helo barnaamijka Wakiilka OHA iyo Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (shabakada diiwaangelinta iyo hagista ee Oregon) si loo ogaado walaacyada dadka mudnaanta la siinayo.

Marka xigta, gobolka Oregon wuxuu qiimayn doonaa qanaacada guud ahaan ee xubnaha iyo adeeg bixiyaha, marin u-helida iyo tayada daryeelka ee hababka soo socda:

- **Qanaacada xubnaha iyo adeeg bixiyaha:** OHA waxay qiimayn doontaa qorshe kasta iyadoo adeegsanaysa aaladaha sida sahanka CAHPs, dib-u-eegista Ogeysiisyada Go'aaminta Faa'iidada Xun, rafcaanada, iyo cabashooyinka, iyo hababka jawaab-celinta ee la xoojiyay si loo qiimeeyo qanaacada adeeg bixiyaha.
- **Marin U-helida/Helitaanka:** OHA waxay tixgelin doontaa tilmaamayaasha ku saabsan ku filnaanta shabakada, ka faa'iidaysiga xad-dhaafka ah iyo ka faa'iidaysiga liita, iyo wakhtiga iyo haboonaanta daryeelka. Markay timaado ku filnaanta shabakada, OHA waxay isticmaali doontaa Warbixinta Shabakada Nidaamka Adeeg Bixinta (DSN), kaasoo ay ka mid yihiin miqyaasyada ugu yar ee waqtiga iyo masaafada, si loo qiimeeyo loona kormeero awooda ay bixiyayaasha CCO-yada u leeyihiin inay u adeegaan xubnaha la saadaalinayo inay is-diiwaangeliyaan iyo kuwa haddeer jira; awooda ay u leeyihiin in lahaadaan shabakad ka jawaabayso xogta xubnaha diiwaangashan oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn luqadda la doorbidayo ama matalaadda dhaqameed ee la door bidayo; iyo awooda ay u leeyihiin shabakad ku filan baaxada daryeelka. Markay timaado ka faa'iidaysiga adeegyada, OHA waxay ku tiirsanaan doontaa nidaamka falanqaynta iyo kormeerka kaasoo diiradda saari doona adeegyada mudnaanta leh ee ay u badan tahay in kharash-gareentooda yaraato, sida caafimaadka habdhaqanka; iyo tabashooyinka ee aqoonsadeen xubinka iyo adeeg bixiyaha. Waqtiga iyo ku habboonaanta qiimeynta daryeelka waxay isticmaali doonaan aalado sida DSN iyo ka soo warbixinta tayada si loola socdo marin u-helida xubnaha.

- **Tayada daryeelka:** Iyadoo la waafaqayo Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada (fiiri warqada fikradda Dhiirigelinta Daryeelka Loo Siman Yahay), OHA waxay la socotaa tayada daryeelka iyadoo adeegsanayso tillaabooyinka dejisan ee CMS Medicaid iyo cabbirrada kale ee suurtagalka ah ee lagu dari karo barnaamijyada cabbirka sida tillaabooyinka nidaamka cabbiraada qiimeynta tayada ee CMS ee soo socda. Tallaabooyinka waxaa lagu salayn doonaa heer daryeel oo aasaasi ah (taasoo caksi ku ah bartilmaameedyada hammiga badan ka muuqdo ee lagu isticmaalo Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada).

OHA waxay ku riixi doontaa CCO-yada inay wax ka sii qabtaan xaqsoor la'aanta caafimaadka iyagoo xoojinaya codka iyo go'aan-qaadashada ay bulshada ku leeyihiin moodheelka CCO-yada (eeg warqada fikradeedka Maalgelinta Xaqsoorka Diirada la Saaray) iyo dib-u-qaabaynta Barnaamijka Dhiirrigelinta Tayada si markaa ay xaqsoorka u noqoto mabda'a abaabul ee aasaasiga ah (eeg warqada fikradda Dhiirigelinta Daryeelka Loo Siman Yahay). OHA waxay sidoo kale ku talo jirtaa in ay dhiirigeliso qaar ka mid ah cabbirada iyadoo ku slayneyso jinsiyada, qowmiyada iyo luqadda sida ay ku talinayaan Guddiyada Cabiraada iyo Dhibco-bixinta iyo Cabiraada Tayada Xaqsoorka Caafimaadka ee la qorsheeyay.

Istaraatijiyada yareeynta ee 2-aad: Samee kormeero maaliyadeed oo xoogan oo sanadle ah

Gobolka Oregon wuxuu sameyn doonaa kormeero maaliyadeed oo xoogan oo sanadle ah, oo ay ku jiraan kormeerida ka faa'iidaysiga iyo kharash-gareynta, si loola socdo hantida CCO-yada iyo si loo xaqiijiyo in yoolalka sanadlaha ah ay yihiin kuwo macquul ah marka la eego bixinta kharashaadka la filayo, sidoo kalena in la sameeyo hab wax looga beddelayo miisaaniyada haddii dhacdooyinka aan la filaynin, sida daaweyn cusub oo kharashkeedu badan yahay, ay keenaan in qiyaasta sannadlaha ah aysan ku filnayn daboolida baahiyada caafimaad ee xubnaha. OHA waxay isticmaali doontaa sicir diiradda la saaray iyo nidaamyada qandaraasyada si ay ula xisaabtamaan CCO-yada. Beddelkii khayraadyo muhiim ah lagu bixin lahaa sameynta qiimooyin/sicir sanadle ah oo ku saleysan kharashaadka sanadkii hore ee CCO-yada, gobolka Oregon wuxuu khayraadyo gelin doonaa falanqeynta xaqsoorka caafimaadka iyo isbeddellada kharashaadka adeegyada la xiriira daryeelka caafimaad, falanqaynta marin u-helida daryeelka iyo saamiga khasaaraha caafimaad (MLR). Gobolka Oregon wuxuu qorsheynayaa inuu adkeeyo cabiraada maaliyadeed (tusaale, shuruudaha MLR ee ugu yar). Intaas waxaa dheer, gobolka Oregon waxaa laga yaabaa inuu adeegsado nidaamyo maaliyadeed oo kale si CCO-yada loogala xisaabtama gaarista yoolalka loogu talagalay adeegyada qaarkood, sida caafimaadka habdhaqanka ama maareynta cudurrada raagga. Markii la abuuro hab lacag-bixin oo cusub oona dabacsan, gobolka Oregon wuxuu filayaa in caddada lacagta, marka la eego cabbirada tayada iyo la xisaabtanka labadaba, ay kori doonto waqti kadib maadaama uu moodheelka CCO-yada wanaajin doono daryeelka oo uu yareeyn doona kobaca kharashka. OHA waxay sii wadi doontaa inay adeegsato aaladaha loo sameeyay iibka ugu dambeeyay ee CCO-yada si ay ula socoto kharashaadka caafimaadka ee heerka sare ah ama kharsh-gareynta caafimaad ee heer hoose ah iyo si ay u dhiirigeliso in khayraadyadaas la geliyo waxkaqabadyada kharashoodu yar yahay leh tayo/qiimo sare.

Waxa siyaasadahani uga dhigan yhiin xubnaha OHP

Dejinta miisaaniyad guud oo qiimo ku salaysan waxay iswaafajin doontaa dhiirigelinada maaliyadeed ee CCO-yada si marka xubnaha OHP ee qaba baahiyada sare ee daryeelka caafimaadka ay u helaan isku-duwid daryeel oo wanaagsan, u helaan adeegyada la xiriira caafimaadka, oo ay ku jiraan helida macaashyada dheeraadka ah marka ay ka wareegayaan xarumo una wareegayaan kuwa kale, sida jeelasha iyo xabsiyada.

Xubnaha OHP waxay sii wadi doonaan helida noocyada kala duwan ee daawooyinka waxtarka leh. Qayb kastoo daawaynba, ugu yaraan hal daawo ayaa la caymin doonaa waxayna xubnaha OHP awoodi doonaan inay codsadaan inay helaan mid midaa ka duwan iyagoo u marayo daryeel caafimaad bixiyahooda.

Xubnaha OHP, qoysaska, iyo bulshooyinka waxay arki doonaan koror ku yimaado maalgalinta bulshada oo ay sameynayaan CCO-yada sababo la xiriira kobaca kharashka oo la joogteyn kara iyo maalgalinada bulshada ee loo baahan yahay awgood.

Gunaanudka

Tobankii sano ee la soo dhaafay, gobolka Oregon wuxuu sameeyay horumar xooggan oo ku saabsan in uu dhiirigelinta maaliyadeed ka beddelo maalgalin dhaqameedii diiradda saareeysay maalgelinta kharash-gareynta daryeelka caafimaadka iyo daaweynta oo uu beddelo kordhinta in diiradda la saaro kahortagga cudurada, adeegyada caafimaadka la xiriira, iyo daryeelka la isku-duway ee lagu daweeyo qofka oo dhan. Si kastaba ha ahaatee, inkasta oo dadaalladan la sameeyay, in aasaasiyan la beddelo moodheelka dhaqaale ee qorshayaasha Medicaid ee Oregon ayaa noqotay mid aan macquul ahayn, sababta ugu weyna waxaa weeye xaddidaadyo la xiriira habka dejinta sicirka/qiimaha. Gobolka Oregon wuxuu raadsanayaa dabacsanaan tanaasulid si uu u abuuro isbeddelkan aasaasiga ah, si markaa lacag-bixinta, dhiirigelinta (fiiri warqada fikrada Dhiirigelinta Daryeelka Loo Siman Yahay), iyo isla-xisaabtanka ay dhammaan ay si wadajir ah u horseedaan dad caafimaad qaba. Waxaan codsaneynaa oggolaansho si aan si wanagsan ugu maareyno kharashka kor u kacayo ee daawooyinka kaasoo yareynaya isbeddelka kheyraadyo ee lagama maarmaanka u ah in gobolkayaga laga gaaro yoolalka caafimaadka dadweynaha iyo xaqsoorka caafimaadka. Waxaan sidoo kale raadsanaynaa awooda lagu xaqiijinayo in qaddar cayiman oo maalgalin lagu sameeyo xaqsoorka caafimaadka iyo baahiyaha bulshada, iyadoo ay bulshadu hoggaan ka tahay tani, sida uu dhigayo sharciga HB 3353 ee dhowaan la meel mariyay (eeg warqada fikrada Maalgelinta Xaqsoorka ee Diirada la Saaray).

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.